


# Maxaa hadda loo sameynayaa?


Interstate 5 wuxuu bixiyaa isku xir muhiim ah oo u dhexeeya Oregon iyo Washington kaasi oo taageera shaqooyinka degaanka iyo qoysaska, waana wado ganacsi oo muhiim u ah dhaqaalaha gobolka, qaranka iyo caalamka. Si kastaba ha ahaatee, isticmaalayaasha buundada waxaa saameyn ku yeeshay ciriiriga culus, arrimaha la xiriira badbaadada, kala doorashada gaadiidka dadweynaha ee kooban, iyo xarumaha gaadiidka firfircoon oo aan ku filnayn. Iyada oo la adeegsanayo ansixinta taariikhiga ahayd ee xirmada kaabayaasha federaalka, gobolkeenu wuxuu leeyahay fursad hal mar soo maartay oo uu ku helayo suurtagalnimada balaayiin deeqaha lacageed ee federaalka oo la qaybinayo iyada oo la sii marayo dhismaha barnaamijka IBR. Lacagahani waa kuwo si heerkoodu sarreeyo loogu tartamayo iyada oo, haddii aan la lagu kharash gareyn gobolkeena, ay aadi doonto mashaariicda kaabayaasha oo kale oo ka jira Maraykanka.

**Kumanaan kun oo shaqo ah oo warshado badan ah ayaa la abuuri doonaa inta lagu jiro muddada wax la dhisayo** – oo u faa'iideynaya shaqaalaha, ganacsiyada degaanka, iyo qoysaska. Beddelaada buundada lagu beddelayo qaab-dhismeed casri ah, oo dhulka gariirka u adkeysta, oo qaabab kala duwan leh wuxuu kor u qaadi doonaa badbaadada oo ka dhigi doonaa dadka – iyo dhaqaalaheena – mid u socda dhanka mustaqbalka.

## Qiimaha ay ku kacayso In aan Waxba La sameyn

- **In ka badan $132 milyan** oo ah qiimaha alaabta xamuulka ayaa ka gudbay Interstate Bridge maalin kasta sanadkii 2020. Ciriiriga iyo buundada wiishka leh waxay hoos u dhigaan xamuulka alaabta sida ee ku fidsan I-5.
- Buundada hadda jirtaa waxay ku kacaysaa **$1.2 milyan sanadkii si loo hawl galiyo** oo loo dayactiro waxaana loo baahnaan doonaa qiyaastii **$270 milyan oo ah lacagta dayactirka marka la gaaro 2040.** Tani kuma jiro kharashka qalabka dhul gariirka loogu talagalay.
- Sanad kata oo aan sugno hagaajinta buundada, kharashka ayaa kordha. Sicir bararka oo kaliya ayaa keenay korodhka qiimaha oo la taaban karo tan iyo dadaaladii beddelaada ee hore.

## Waqtiga loo qabtay Barnaamijka



# Barnaamijka Beddelaada Buundada Interstate-ka

**Ka gudbiga Webiga:**
Dhul gariirka cusub-adkeysi u leh, buundo qaababka kala duwan leh

**Waddooyin:**
Waxaa lagu darayaa waddooyinka jidka geeskiisa mara oo ammaan ah iyo layman dheeraad ah iyo in wax laga beddelo 7 ah jidadka isweydaaranaya 'interchanges' oo si dhow loo kala fogeeyay

**Gaadiidka:**
Waxaa la kordhinayaa Tareenka Fudud oo lagu darayaa baska degdega ah oo jidka geeskiisa mara 'bus on shoulder' si hab wanaagsan la iskugu xiro nidaamyada gaadiidka

**Gaadiidka Firfircoon:**
Isticmaalka dariiqyo la wadaago ammaan ah oo la gali karo

**North Portland Harbor:**
Dhul gariirka cusub-buundo adkeysi u leh




*Aragti qaadashada 'visualizations' waxaa loogu talagalay ujeeddooyin dhanka sawirka ah oo kaliya mana aha in la cabbiro. Iyagu kama tarjumaan saameynta hantida kamana dhigna naqshad dejinta u dambeysa. Saameynta iyo faa'iidooyinka barnaamijka ayaa daraasad lagu sameyn doonaa habka deegaanka, oo ay ku jiraan waxyaabaha sida qaabka 'configuration' buundada iyo 1 iyo 2 layn oo dheeraad ah.*

## Faa'iidooyinka:

- Wuxuu abuurayaa marin dhul gariirka u adkeysa oo wanaajiya ammaanka, ciriiriga, iyo isku halaynta
- Wuxuu kor u qaadaa faa'iidooyinka oo yareeyaa culeyska bulshooyinka mudnaanta la siinayo sinaanshaha leh
- Wuxuu wanaanjiyaa dhaqdhaqaaqa xamuulka iyo isku xirka
- Wuxuu kordhiyaa fursadaha kala doorashada gaadiidka iyo wax beddel ah oo la heli karo ee gawaarida hal qof saaran yahay 'single-occupancy vehicles'
- Wuxuu taageeraa kumanaan kun oo shaqo ah wuxuuna abuuraa ku dhawaad 2x oo ah soo celinta maalgelinta inta uu socdo dhismuha.
- Wuxuu taageeraa hadafka dhanka cimilada ee labada gobolba




## Kharashka & Maalgelinta

- Qiyaasta kharashka ee uu hadda ku kacayo waa inta u dhaxaysaa $5 iyo $7.5 bilyan, iyada oo ay u badan in kharashku noqdo $6 bilyan. Qiyaastan kharashku waxay ka turjumayaa qaybaha hadda iyo kuwa la taageeray ee LPA Wax laga beddelay iyo xisaabaadka loogu talagalay sicir bararka, iyo khataraha korodhka kharashka, iyo xaaladaha suuqa ee hadda jira.
- Hal qayb oo ka mid ah maalgelinta federaalka ayaa la is guddoonsiiyay iyada oo la adeegsanayo **$600 milyan oo ah deeqda lacageed ee MEGA grant.**
- Gobolka Washington waxaa ka go'an oo uu ku ballan qaaday **$1 bilyan** iyada oo la adeegsanayo xirmada Move Ahead Washington ee 2022.
- Oregon waxaa ka go'an oo ay ku ballan qaaday **$1 billion** iyada oo la adeegsanayo Sharciga La Soo Jeediyay 5005 ee 2023.
- Haysashada dhammaan lacago u dhigma kuwa aan federaalka ahayn oo jira waxay muujinaysaa in ay gobolka wax ka go'an yihiin waxayna kordhinaysaa tartanka codsiyada deeqda lacageed ee federaalka.
- Lacag bixinta 'tolling' u horreysaa waxaa dhici karta in ay noqoto sida ugu dhakhsaha badan ee ugu soo horreysa ee 2026. Si kastaba ha ahaatee, barnaamijku wuxuu sameyn doonaa daraasado badan si loo falanqeeyo xaaladaha kala duwan ee lacag bixinta 'toll', lacag dhimista, iyo wax iska dhaafida oo ay ku jiraan tixgelinta barnaamijka lacag bixinta 'toll' ee dadka dakhligoodu hooseeyo, si la iskugu wargeliyo talooyinka heerka lacageed ee toolka 'toll'. Guddiyada Gaadiidka Oregon iyo Washington ayaa dejin doona heerarka lacageed ee toolka 'toll'.

## Ka qayb galinta Bulshada

- Ku dhawaad **40,000 kulan** ayaa lala yeeshay xubnaha ka tirsan bulshada
- **19 deeqaha lacageed ee yar yar ayaa la siiyay** ururada ku saleysan bulshada si looga caawiyo wacyigelin loo siman yahay
- Qaabka Sinnaanta ayaa la abuuray iyada oo lala kaashanayo **Kooxda Tala bixinta Sinnaanta**
- Qiimaha iyo mudnaanta siinta bulshada ayaa la aasaasay iyada oo lala kaashanayo **Kooxda Tala bixinta Sinnaanta**
- **4 kooxood oo hoggaamineed iyo tala-bixin** oo bixinaya jawaab celin si la iskugu wargeliyo shaqada barnaamijka

## TALLAABOOYINKA XIGA

Barnaamijku wuxuu sii wadi doonaa raadinta fursadaha deeqda lacageed iyo dhammeystirka Qoraalka Saameynta uu u leeyahay Deegaanka ee Dheeraadka ah, si hab wanaagsan loogu fahmo faa'iidooyinka iyo saameynta uu leeyahay. Dokumentiga ayaa la heli doonaa si dib loogu eego oo faallo looga dhiibto. Wanaajinta si wax looga qabto jawaab celintu waxay keeni doontaa Qoraalka Kama dambeysta ah Saameynta uu u leeyahay Deegaanka ee Dheeraadka ah iyo Diiwaanka Go'aanka ee Wax laga beddelay. Marxaladani, barnaamijku wuxuu awood u yeelan doonaa in uu codsado oggolaansho, cusbooneysiiyo qiyaasaha kharashka, oo dejiyo naqshad si loo diyaariyo dhismo.

**Nala soco: www.interstatebridge.org si aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah, isku diiwaangeli wargeyskeena, ama gudbi faallo.**

**OREGON**
Wixii la xiriira ADA (Sharciga Dadka Naafada ah ee Maraykanka) ama Xuquuqda Madaniga ah Title V qorshayaasha, adeegyada turjumaad/fasiraadda, ama macluumaad dheeraad ah wac 503-731-4128, TTY 800-735-2900 ama Adeegyada Gudbinta Wararka ee Oregon 7-1-1.

**WASHINGTON**
Codsiyada wax sii qorsheynta ee loogu talagalay dadka naafada ah ee ku nool Washington ayaa la sameyn karaa iyada oo lala xiriirayo kooxda WSDOT Diversity/ADA Affairs oo laga helo wsdotada@wsdot.wa.gov ama iyada oo la wacayo khadka bilaashka ah, 855-362-4ADA (4232). Dadka aan dhagaha wax ka maqal ama maqalku ku adag yahay waxay sameyn karaan codsi iyaga oo soo wacaya Adeegyada Gudbinta Wararka ee Gobolka Washington ee 711. Qof kasta oo aaminsan in ilaalintiisii/ilaalinteedii Title VI lagu xadgudbay, waxay cabasho u gudbin karaan Iskuduwaha Xafiiska Fursada Loo Siman Yahay (OEO) Title VI ee WSDOT iyada oo lala xiriirayo (360) 705-7090.